



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA AGOOSTO 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Agoosto 2023 ayaa gaaray 142.58, marka la barbardhigo 144.89 bishii Julaay 2023.

Isbedel bileedka, Agoosto 2023, marka la barbar dhigo Julaay 2023, ayaa hoos u dhacay -1.60 boqolkiiba. majirin isbedel la taaban karo bishii Agoosto. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Agoosto 2022 iyo Agoosto 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.82 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.98 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Julaay 2022 iyo Julaay 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Agoosto 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Agoosto 2023	
Tusaha bishan (Agoosto 2023)	142.58
Tusaha bishii hore (Agoosto 2023)	144.89
Tusaha sanadkii hore (Agoosto 2022)	134.74
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-1.60%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.98%

HEERKA SICIR BARARKA MARKA LOO EEGO TSB-da

Tixraca TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12billod

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Agoosto 2023

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Agoosto 2023

Heerka sicir-bararka bisha Agoosto 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2022 iyo Agoosto 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.82 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2022 iyo Agoosto 2023, marka labar bardhigo 5.98 boqolkiiba 12kii bilood, Julaay 2022 iyo Julaay 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Agoosto 2023 ayaa hoos u dhac dhan -1.60 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Agoosto 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada**, **guryaha**, **biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi ayaa hoos u dhacay -2.99 boqolkiiba, bishii Agoosto 2023 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 0.37 boqolkiiba bishii Julaay 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -2.08 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.19 boqolkiiba Julaay 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -0.20 boqolkiiba Agoosto 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 15.62 boqolkiiba Agoosto 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo hoos u dhacay 15.85 boqolkiiba ee Julaay 2023.

DHAMMAAN QEYBAHA TSB-da & QEYBAHA KALE EE LAXUSHAY

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Agoosto 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 84.03 boqolkiib bishii Agoosto 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+116.67 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 25.25 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+40.17 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 15.62 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, Gaaska & Shidaalka (+20.68 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay qiimaha dhuxusha iyo xaabadda wax lagau karsado oo gaaray (+44.00 boqolkiiba)
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac dhan 14.36 boqolkiiba Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.55 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+31.36 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 10.56 boqolkiiba, bishii Agoosto 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+19.81 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.70 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha adeega Gaadiidka (+32.36 boqolkiiba). Sae u kaca waxaa ka yimid rakabka gawarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.74 boqolkiiba Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+8.91 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 6.42 boqolkiiba Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+13.79 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.60 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+5.70 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Agoosto 2023 (-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sanadlaha ahi ayaa hoos u dhacay -2.08 boqolkiiba, bishii Agoosto 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay cuntada oo qiimahoodu gaaray (-2.14 boqolkiiba) Sababta oo ah hoos u dhac ku yimid qiimaha saliida iyo dufanka (-38.53 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Agoosto 2023

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Agoosto 2023 (+)

- Guud haan majirin sare u kac la taaban karo bishii Agoosto.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Agoosto 2023 (-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi ayaa hoos u dhacay -2.99 boqolkiiba, bishii Agoosto 2023. Hoos u dhaca ugu badan waxaa sababay cuntada oo qiimahoodu gaaray (-2.89 boqolkiiba) Sababta oo ah hoos u dhac ku yimid qiimaha qudaarta (-13.68 boqolkiiba).

- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille 3.10 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (-4.74 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Agoosto 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Agoosto 2022 TSB	Julaay 2022 TSB	Agoosto 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	134.74	144.89	142.58	-1.60	5.82
Cuntada & Cabitaanada	46.04	148.70	150.10	145.60	-2.99	-2.08
Tubaakadda	1.25	90.93	167.33	167.33	0.00	84.03
Dharka & Kabaha	5.03	147.53	169.47	168.72	-0.45	14.36
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	120.18	139.23	138.95	-0.20	15.62
Agabka Guryaha	2.93	109.53	116.56	116.56	0.00	6.42
Caafimaadka	5.00	161.16	178.18	178.18	0.00	10.56
Gaadiidka	3.77	110.57	121.29	121.29	0.00	9.70
Isgaarsiinta	2.80	103.03	130.10	129.05	-0.80	25.25
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	140.72	150.45	145.78	-3.10	3.60
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.27	119.47	118.80	-0.56	7.74

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Agoosto, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Sebteembar, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Agoosto 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Ishaxogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia